

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya  
Dowlad Goboleedka Galmudug  
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha



Galmudug State  
Ministry of Finance & Economic Development

جمهورية الصومالية الفدرالية  
حكومة إقليم جلمدج  
وزارة المالية وتنمية الإقتصاد

## Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2018

### Xeer-nidaamiyaha 10aad ee Dowlad-goboleedka.

#### Hirgelinta Heshiiska Gaarka ah ee Mideynta Cashuurta iyo Kastamada.

1. Sida ay dhigayaan qodobbada qaybta 30aad, baragaraafyada 81 – 86 ee Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka, ayaan anniga oo ah Wasiirka Maaliyadda waxaan halkaan ku hirgelinayaa qodobbada heshiiska ku yaalla lambarka taxan ee 1 ee jadwalka 13aad ee Xeerka Dakhliga, oo magaciisu yahay: Heshiisyada Gaarka ah ee Mideynta Cashuuraha iyo Kastamada iyo sidoo kale geeddi-socodyada, lagu saxiixay Garoowe 27<sup>kii</sup> Sebtembar 2017.
2. Soo rogista cashuurta kastammada ee soo-dhoofinta jaadka iyo sigaarka ayaa halkaan lagu ansaxiyey.
3. Lama oggolaanayo in uu jaad soo dhoofiyo qof aaney Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka u diiwaangelin in uu yahay Soo-dhoofiye Jaad. Ku-xadgubbidda xeer-nidaamiyahan waa fal-dembiyeed. Waa in aan diiwaangelinta laga oggolaan haddii:
  - a. cidda soo codsaneysa aaney ahayn shakhsi dabiici ah,
  - b. codsadhaha uusan u diiwaangasheynin in uu cashuur-bixiye ka yahay Dowlad-goboleedka ka tirsan Federaalka Soomaaliya,
  - c. codsadhaha lagu heley dembiyo la xiriira ganacsi ama cashuur,
  - d. codsadhaha lagu heley dembiyo la xiriira argagaxisanimo,
  - e. codsadhaha uusan si joogto ah u diyaarin diiwaanno la aqbali karo ama uu ku guuldarreysto in uu bixiyo dokumentiyo la aqbali karo, si waafaqsan tilmaamaha/amarrada,
  - f. codsadhaha uusan u hoggaansamin shuruudaha ku jira **Heshiiska** lagu xusey baragaraafka 81 ee Xeerka Dakhliga.
4. Diiwaangelinta cid loo diiwaangeliyo in ay soo dhoofiso Jaad ayaa laga yaabaa in lagu cayimo xaddiga ugu badan ee Jaadka ee soo-dhoofiyaha loo oggol yahay in uu sanadkii soo dhoofiyo.
5. Qiimayaasha cashuurta laga qaadayo Jaadka iyo sigaarka waxaa ay waafaqsan yihiin heshiiska waxaana lagu cayimey jadwalka 3aad ee Xeerka Dakhliga. Qiimayaashan ayaa la raacayaa ilaa jadwal cusub lagu ansaxiyo **Xeer-nidaamiye**, marka laga soo tago heshiis kasta ama wax-ka-beddel kasta oo kan ku xiga oo lagu sameeyo shuruudaha heshiiska ee lagu taxay lambarka 1aad ee tirada taxan ee jadwalka 13aad.

*Revenue Regulation 10.*

*Implementation of Special Agreement on the Harmonisation of Tax and Customs.*

6. Dakhliga Kastanid ama Cashuur ahaan loo saarey Jaadka iyo sigaarka oo uu qaado dowlad-goboleedka, waxaa loo qoondeynayaa dowladda Dowlad-goboleedka Ka Tirsan Federaalka.
7. Ururinta dakhliga Kastmada iyo Cashuurta Jaadka iyo sigaarka waxaa mas'uuliyaddeeda lahaanaya waaxda Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee mas'uulka ka ah Kastammada.
8. Habraacyada ururinta, diiwaangelinta iyo risiidh u-sameynta waa in loo sameeyaa si waafaqsan dhammaan habraacyada ay cayintey Hay'adda Dakhli-Ururinta laguna faafiyo Xeer-nidaamiyeyaal.
9. Wakiil dakhli-ururin oo loo aqoonsan yahay kastammada waa in loo cayimaa loona diiwaangeliyaa si waafaqsan qaybta 25aad ee Xeerka Dakhliga ee Dowlad-goboleedka.
10. Soo-dhoofinta Jaadka iyo sigaarka waxaa ay dhici kartaa keliya marka la helo soo-dhoofin la ansaxiyey waxaana ay ka dhici kartaa keliya goobaha lacagta lagu qaado. Isku-day kasta oo la isku dayo in laga soo geliyo meelo aan loo aqoonsan, ama cashuur-ururin aan la ansaxan waa fal-dembiyeed waxaana lagu muteysan karaa xabsi aan la iibsan karin oo ah ugu yaraan 2 sano, waana in diiwaangelinta lagala noqdaa.
11. Waxaa Agaasimaha Hay'adda Dakhli-ururinta halkaan loogu igmadey awood uu ku soo saaro tilmaamo/amarro la xiriira ururinta iyo diiwaangelinta dakhliga Kastanka iyo Cashuuraha Qaadka iyo Sigaarka si waafaqsan **Xeer-nidaamiyaha** iyo si waafaqsan heshiiska af-garadka.

**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug**

**Mudane: Saciid Siyaad Shirwac**

